Marnaba gurigaaga maaha: Sharciyeynta takoorka (kala sooca) socdaalka ama imigireeshanka Kanada waa qoraal cusub oo aad muhiim u ah kaas oo dokumenti gareynaayo sagaal sano oo isbadalo takoor ama kala sooc xagga socdaalka ama imigireyshanka ah oo ay sameysay dowladda federaalka Kanada.

Qoraalkan wuxuu shaaca ka qaadayaa in jinsiyad qaadashada Kanada ay noqoneyso mid si adag lagu helo si fududna lagu waayo. Sharciga deginaanshaha joogtada ah ee qaxootiga, shaqaalaha xirfada leh iyo xubnaha qoyska wuxuu noqonayaa mid la koobay ama la xadeeyay, laakin barnaamijka shaqaalaha soo galootiga ah wuxuu balaaranayaa. Sharci fulinta ama talaabo ka qaadida sida xabisid, dib u celin (tarxiilid) iyo maxkamadeynta qarsoodida ah ayaa sii badanaya . Dareemada aadka u soo badanaaya sida qaxooti been ah, argagixiso iyo ajaanib xadaaya shaqooyinka ayaa waxey sabab u noqdeen ka saarida iyo fogeynta dadka cusub ama soo galootiga ah. Haddii dadka cusub ama soo galootiga loo ogolaado iney soo galaan waddanka waa mid si ku meel gaar ah, shuruud ku xiran ama xaalad aan sugneyn ama aan leysku haleyn karin.

Qof aanan sharci aheyn ma jiro (faraca) Fankuufar ayaa soo saaray qoraalkan. Waxaad ka aqrisan kartaa qoraalkan oo dhameystiran Ingiriis na ah ama aad ka daawan kartaa isagoo fiidiyow ah boggan ***http://neverhome.ca***

Qodobada ugu muhiimsan ee qoraalka “Marnaba gurigaaga maaha”:

Jinsiyadda ama dhalashada: u dhalashada Kanada waxey noqoneysaa mid si adag lagu qaato si fududna lagu waayo. Tirada soo galootiga ama dadka cusub ee noqday muwaadiniin hoos ayey ugu dhacday 79 boqolkiiba 26 boqolkiiba marka la eego dadka soo galay waddanka inta u dhaxeysay sanadkii 2000 ka illaa iyo 2008 dii. Dadka Muslim ka ah ee noqonaya Kanadiyaan ka ayaa si gaar ah loola tiigsaday arrinkan sida tusaale ahaan xannibaada lagu soo rogay indhashareer ka dumarka xerta kolka ay ka qeyb galayaan xafladda dhalashada lagu qaato. Sharciga cusub ee lagu magaabo “Dhalasho ka xadidda” (Bill C-24) wuxuu sharciyeynayaa dhalasho darajo hoose ah.

Shaqaalaha shisheeye ee ku meel gaarka ah: Kanada imminka waxey ku aqbashaa barnaamijkan ku meel gaarka ah dad ka fara badan barnaamijka siinaya dadka cusub sharci degnaasho joogto ah. Dowladda federaalka waxey guud ahaanba baabi’isay 280,000 codsi oo ku imaan lahaa banmaamijka shaqaalaha xirfadda leh sidoo kalena ka qaaday daryeelayaasha (caregivers) xaqqa la damaanad qaaday ee deganaanshaha joogtada ah halka ay ka sedex jibaarantay tirada codsiyada shaqaalaha shisheeye ee ku meel gaarka ah tobankii sano ee la soo dhaafay. Tani waa nidaam albaabeed soo noqnoqonaaya: Inkastoo shaqaala fara badan lagu keeno xaalado looga faa’iideysanayo kuwa fara badan oo ka mid ah si dhaqso ah ayaa looga saarraa wadanka. Sharci dowladda federaalka ah ee afar keen afar bixi dartiis in lagu qiyaaso 70,000 shaqaale shisheeye oo ku shaqeeyo mushaar aad u hooseeya ayaa waxey halis ugu jiraan in qasab looga saaro waddanka. Tani waa mid ka mida tarxiilid dad fara badan mar qura laga tarxiilo kuwa ugu badnaa taariikhda Kanada.

Mideynta xubnaha Qoyska: tiradad dadka cusub ee ku imaanaya visaha nooca familka ayaa hoos u dhacay boqolkiiba 20 shanta sano ee la soo dhaafay ee xukunka dowladda muxaafidka ah (conservative). Waalidiinta iyo waalidiinta waalidiintooda inta badan imminka waxey kaliya oo ay ku imaan karaan fiisada suber ka loo yaqaano ee booqashada ku meel gaar ka ah oo u baahan iibsiga ceymis

caafimaadeed oo Kanada ah. Xaasas badan waa iney ku yimaadaan isboonsor shuruudi ku xiran tahay, caruurta da'doodu weyn tahayna lama soo isboonsari karo. Waqtiga lagu dhameynayo isboonasarada xaaska ah ee laga xareeyo gudaha Canada wuu sedex jibaarmay waxeyna sababtay in dhaleeceyn canaan wadata oo ka timid xafiiksa hanti-dhowrka guud. Xadka dakhliga looga baahan yahay qofka raba inuu isbonsaro familkiisa sara ayuu kacay taas oo ka dhigeysa mideynta qoyska mid ah mudnaan gaar u ah kuwa hantida leh kaliya.

Qaxootiga: Ka saarid ballaaran iyo buunbuunin sii badaneyso oo ku saabsan "qaxooti been ah" oo ay waddo dowlada federaalka ah ayaa sababtay in 50 boqolkiiba ay hoos u dhacdo tirada dadka qaxootinimo doonka ah iyo hoos u dhac ah 30 boqolkiiba oo ku yimid tirade qaxootinimada loo aqbalayo. Qaxooti fara badan ayaa la tacaalaya jirintaanka waddooyin sharci ah oo yar, xabsi gelin qasab ah ee lala beegsado iyaga iyo caruurtooda, nidaam u qeysan labo oo ku kala sooca qaxootiga dhalashadooda iyo wadanka ay ka soo jeedaan iyo adeeg caafimaad iyo mid bulsho oo ku filan laa'aantii. Haddii ay u suuragasho in loo aqbalo qaxootinimana, xaaladooda qaxootinimo waa mid shuruud ku xiran. Dowladda muxaafidka ah waxey dhinac u dhigtay lacag dhan 15 milyan oo doolar iney gaarto tiro sanadeed 875 oo ay ku tiigsaneyso iney kaga qaado ama kaga xayuubiso qaxootiga xaaladda qaxootinimo, tirada qaxootiga hore ee waayay xaaldoodi sugneyd ama laga qaaday sharcigooda degenaasho ayaa afar jibbaarmay.

Xabsi dhigid: Dowladda Kanada waxey xabsi dhigtay 87,317 soo galooti ama dad ku cusub dalka iyaga oo aan wax dembi ah lagu soo oogin inta u dhaxeysay 2006 da iyo 2014 ka, kuna qarash gareysay in ka badan rubac biloyoon (ka badan 250 milyan) xarriga ama xabsi dhigidda soo galootiga mudo shan sano ah. Soo galootiga, oo ay ku jiraan 807 caruur ah sanadkii, ayaa ah dadka kaliya ee la iskaga xiri karo Kanada dhexdeeda iyaga oo aan lagu soo oogin wax xadgudub dambiyeed. Xabsi dhigiddaan waxaa ku jiri kara xarig aan xilli uu ku eg yahay aysan jirin, kaas oo dhaleeco joogto kaga timid Qaramada Midoobay. Sanadkii 2013 ka kaliya soo galootiga waxey xabsiga ku qaateen marki leysku wada gadeeyo mudo gaareysa 503 sanadood oo xabsi ah. Dadka soo galootiga ah qaarkood ayaa illaa iyo imminka wajaha xabsi dhigid qasab ah, hooyooyinka xabisan ayaa wajaha iyaguna dooqa ama kala doorashada xanuunka badan ee ah iney caruurtooda xabsiga la galaan ama ay ku wareejiyaan hey'ad daryeelka caruurta ah.

Tarxiilid ama Musaafurin: Dowladda Kanada waxey musaafurisay ama tarxiishay tiro dad ah oo gaaraya 117, 531 inta u dhaxeysay 2006 da iyo 2014 ka, oo ay ku jiraan waddamo aan in dad loo tarxiilo ay mamnuuc tahay. Dowlada federaalka iyo hey'adda adeegga xuduudka Kanada ayaa laaluusha dadka si ay isku tarxiilaan sidoo kale waxey isticmaalaan tahriibiyayaal caalami ah si dadka loogu sameeyo waraaqado been abuur ah si ay u musaafiyaan dadka soo galootiga ah waddamo ay wax xiriir ah la laheyn. Qaxootiga ayaa laga qaadaa sharcigooda deganaansho ee joogtada ah waxeyna la kulmaan musaafurin, dadka soo galootiga aan diiwaan gashaneyn ayaa iyagana la kulma musaafurin siyaado ah oo guryaha loogu soo galo si qasab ah, sidoo kale dadka heysta degenaashaha joogtada ah ee gala denbiyo yar yar – oo ay ku jiraan denbiyo la xiriiri gaari wadasho – ayaa la musaafuriyaa iyaga oo aan laheyn xaq racfaan ama (appeal).

Tallaabooyin xagga ammaanka ah: Qaxootiga iyo dadka heysta deganaashaha joogtada waxey la kulmayaan maxkadeyn qarsoodi ah, musaafurin ama in layska hilmaamo taasoo ku imaata hannaan xagga ammaanka ah oo aad loo adkeeyay. Sharciga cusub ee argagaxiso la dagaalanka sharciga boliiska qarsoon waxey siinayaa awood xad dhaaf ah oo xagga dabagalka ah, maxkamadeyn denbi baarid qarsoodi ah iyo xabsi dhigid ka hor tag ah oo aan denbi ku saleysneyn. Dowlada Kanada waxey liiska argagixisada ku dartay ururo samafal iyo dhamaan dhaqdhaqaaqyada xoriyad u dagaalanka ee Falastiin. Iyada oo lagu marmarsiiyo laga dhiganayo qeexidda erayga Argagixiso oo aan caddeyn waxaa si fudud looga qaadi karaan dad Kanadiyaan badan dhalashadooda.

Mudnaanta maalgelineed: In ka badan 53 milyan doolar ayaa laga jaray lacagta lagu bixin jiray adeegyada socdaalka ama imigireyshan ka, iyada oo ay la filanayo jarid kale oo dheeraad ah oo ku timaada maalgelinta caafimaadka qaxootiga iyo tababarka luqadda Ingiriiska. Xafiisyada dowladda ee bixin jiray adeegyo u furan dadka iyaga oo aan balan sameysan waa la wada xiray, shaqaalihii tababarnaa ee ka shaqeynayay xafiisyada intooda kalena waa laga diray shaqada. Tan waxey sababeysaa qadar qaladeed sare oo ku yimaada qaab loo qabto shaqada imigareyshanka; mar la muraajaceynayay taya maamulidda kaliya 88 codsi qaxootinimo waxaa laga helay 113 qalad oo ay dowladu gashay ayaa laga helay. Isla mar ahaantaa, sharci fulinta imigareyshan ka qarashaka ku baxa wuxuu sara u kacay 107 milyan oo doolar inta u dhaxeysay 2010 ka iyo 2013 ka, iyada oo guud ahaanna lagu qarash gareeyay lacag dhan 1.8 bilyan miisaaniyah ah sanadka 2014 ka howlaha fulinta sharciyada imigareyshanka.